Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

**MOF/OM/1675/2023** **February 27, 2023**

# Xeer-Nidaamiyaha Aasaasida iyo Adeegsiga Jadwalka Qiimaha Alaabta, ee February 2023

Iyadoo la dhaqangalinaayo awoodaha ku xusan Qodobka 28aad iyo Qodobka 43(6) ee Sharciga Wax ka badelka Furdooyinka 2020 (Sharci LR.21) Waxaan halkan ku soo saarayaa xeer nidaamiyaha Aasaasida & Adeegsiga jadwalka qiimaha alaabta.

Xeer-Nidaamiyani wuxuu ka kooban yahay qeybaha hoos ku xusan:-

**Qeybta 1aad – Hordhac**

1 - Xigasho
2 - Fasiraad

**Qeybta 2aad– Sameynta "Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka"**

3 - Shaxda la sameeyay ee "Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka"

4 - Jadwalka Waa la Faafindoona

5 - Jadwalka Waxbaa laga bedeli karaa

6 - Taariikhda dhaqan galka wax ka beddelka

**Qeybta 3aad – Dhaqan galinta Jadwalka Qiimha Alaabada ee Furdooyinka**

7 -Dhaqan galinta Jadwalka Qiimaha Alaabada ee Furdooyinka marka aan la heyn Qaanshegtada Alaabta.

8 -Habraaca marka Qaanshegtada aan lagu kalsoonaan Karin amma aan la aqbali Karin

9 -Dhaqan galinta Jadwalka Qiimaha Alaabada ee Furdooyinka marka aan warbixin ku filan alaabada laga heynin ama aan lasoo gudbin.

10 -Xuquuqda racfaan qaadashada sida ku xusan Sharciga Maamulka Dakhliga 2019

11- Xiliga uu dhaqangalayo.

## Qeybta 1aad – Hordhac

Sida ku xusan Qodobka 35-aad ee Sharciga Wax-Ka-bedelka Sharciga Furdooyinka 2020, sicir canshuureedka alaabta dibada laga keenay waxaa la go'aamiyaa iyadoo la tixraacayo Qiimaha caadiga ah "normal price" kaas oo badanaa ku xusan qaansheegadka alaabta, iyadoo la dhaqan galinaayo habka (arms' length).

Nidaamkani wuxuu la jaanqaadayaa mabda'a Qiimaha wax kala iibisiga (Transaction value) ee alaabta la soo dejiyo sida ku cad Heshiiska Qiimaynta ee (WTO) Ururka Ganacsiga Aduunka. Sidoo kale ururka Furdooyinka Adduunka (WCO) ayaa soo saaray hagid ku saabsan sidii maamullada Furdooyinka ay u wajihi lahaayeen heshiiska qiimaynta. Soomaaliya waa xubin ka tirsan ururka Kastamyada Aduunka (WCO).

Ujeedooyinka ugu weyn ee Qodobkani waa qeexida jadwalka qiimaha taasoo waafaqsan sharciga furdooyinka soomaaliyeed, aasaasid iyo adeegsi – kuwaas oo lagu sheegay qodobka 43(6). Qodobkaan waxuu awood u siinayaa Wasaaradda Maaliyadda in ay dib u habeeyso jadwalka qiimaha alaabta (marba marka xiga). Qodobkan waxa uu dejiyay qeexitaan la jaanqaadaya habka kala saarida badeecadaha ee ay isticmaalaan Tacriifada Furdooyinka Soomaaliyeed.

Si loo aasaaso "jadwalka qiimaha alaabta" waxay Wasaaradda Maaliyadda jadwalka u qoondeesay in ay ku jiraan nooc kasta oo alaab ah oo ku jirta tacriifadda Soomaaliya. Arinkani waa hawl soo noqnoqonaysa, marka la eego baaxadda jadwalka iyo dib u eegid ku sameyntiisa. Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka waxaa loo qeexay hab waafaqsan kala saarida iyo magaacibista badeecadaha, kana kooban afar qeybood :- 1- HS code (8 digits), 2-Sharaxaada badeecadaha (4 Digits) , 3- Halbeega unuga alaabta, iyo ugu danbeyn 4- tixraaca qiimaha rasmiga ah.
Tixraaca qiimaha rasmiga ah dib u eegid ayaa lagu sameyn karaa marki la doono iyadoo la tixgelinaayo xogta iyo qiimaha ganacsiga.

Sida uu dhigayo sharciga Furdooyinka Soomaaliyeed 2020, Jadwalka qiimaha alaabada waa in "la dhaqan galiyo" marka "qiimaha caadiga ah ee alaabta" aan la heli karin ama aan la aqbali karin qaansheegta/dokumentiyada taageeraya ee uu qofka soo gudbiyay.Marka la dhaqan galiyo Jadwalka, Canshuurta waajibtay ayaa si sax ah oo habboon loo go'aamin karaa. Dabaqida/dhaqangalinta jadwalka wuxuu dhacayaa marka lagu guda jiro habka cadeynta badeecada lasoo dhoofiyay, Sidaa darteed Qodobkan waa in loo aqriyaa loona dabaqaa si waafaqsan Qodobka Cadeynta badeecadaha furdooyinka 2022.

Hadafka koowaad ee Jadwalka waa in la dhiirigeliyo hoggaansanaanta ikhtiyaariga ah ee dadka wax soo dajiya. Waxay noqon doontaa hab muhiim ah oo ay isticmaalaan Furdooyinka Soomaaliyeed si ay u horumariyaan "habka maareynta qataraha iyo u hogaansanaanta furdooyinka (si waafaqsan Tilmaamaha WCO ee habka qiimeynta iyo isticmaalka jadwalka qiimeynta). Jiritaanka jadwalka iyo isticmaalkiisa saxda ah waxuu keeni doonaa inuu kor u qaado hufnaanta Kastamyada waxuuna meesha ka saari doonaa waxii mad madow ah, iyadoo

ganacsatada iyo dadka wax soo dajiya ogaan karaan canshuurta ku waajibtay maadaama jadwalka la wada yaqaano, meel walbana laga heli karo.

Si kor loogu qaado wacyiga ganacsatada, Shaxda jadwalka waa la daabici/faafin doonaa si Elektaroonik ah. Isticmaalka jadwalka qiimaha alaabta waxaa ilaalinaya oo maamulayana Furdooyinka Soomaliyeed iyadoo jawdwalka loo faafin doono si danabeysan

**Qodobka 1aad**
**Xigasho**

Xeer-Nidaamiyahan marka ay soo xiganaayaan Furdooyinka soomaaliyeed waxaa loogu yeeri doona "X/N Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka ee 2023".

**Qodobka 2aad**
**Fasiraad**

(1) Xeer-Nidaamiyahaan gudihiisa, ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran:

(a) "Sharciga Furdooyinka" waxaa loola jeedaa Sharciga Furdooyinka 2020 (Xeer lambar.21 ee 2020);

(b) "Caddeynta Badeecada ee Furdooyinka" waxaa loola jeeda Caddeynta la sameeyay ee ku xusan Xeer-Nidaamiyaha Habka Loo gudbiyo Faafaahinta Badeecadaha Furdooyinka ee 2023.

(c) "Shaxda "Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka"" waxaa loola jeeda Shaxda qiimaha ee lagu jaangooyay qodobka 4aad.

(d) "Xeer-Nidaamiyaha Habka Loo gudbiyo Faafaahinta Badeecadaha Furdooyinka" waxaa loola jeedaa micnahiisa Xeer-Nidaamiyaha Qaabka loo gudbiyo faafahinta badeeecadaha furdooyinka ee 2023.

(e) "Qiimaha alaabada Canshuurta ku waajibtay" waxaa lagu macneeyay qodobka 34aad ee Sharciga Furdooyinka.

(f) "Wasaaradda" Waxaa loola jeeda Wasaaradda Maaliyadda.

(g) "Sicirka Caadiga ah" waxaa loola jeeda qiimaha alaabta la soo dhoofiyay sida uu qabo Qodobada 35 ilaa 42 aad ee Sharciga furdooyinka.

(h) "Sharciga Maamulka Dakhliga" waxaa loola jeeda Sharciga Maamulka dakhliga ee Sharci lr.13 ee 2019.

(1) Haddii aan lagu qeexin Xeer-Nidaamiyahaan, kelmad amma oraah lagu isticmaalo X/Nidaamiyaha waxaa micnaheeda laga tixraacaya Sharciga furdooyinka & Sharciga Dakhliga.

(2) X/Nidaamiyahani waxaa lala dabaqayaa si joogto ah Xeer-Nidaamiyaha Habka Loo gudbiyo Faafaahinta Badeecadaha Furdooyinka.

## QEYBTA 2AAD
## SAMEYNTA "JADWALKA QIIMAHA ALAABTA EE FURDOOYINKA"

### Qodobka 3aad
### Shaxda "Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka"

Si waafaqsan Qodobka 43(6) ee Sharciga Wax-Ka-bedelka Sharciga Furdooyinka 2020, Furdooyinka Soomaaliyeed waa inaay ilaaliyaan "Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka" kaas oo saleeysan: –

(a) habka kala saarista alaabta ee caalamiga ah.

(b) alaab waliba in loo asteeyaa 12 number oo ka kooban.

i. Sideed number oo habka kalasaarida tacriifada alaabta ah; iyo
ii. Afar number oo u qaas ah nooca alaabada.

(c) alaab waliba iyo halbeegeeda.

(d) tixraaca qiimaha rasmiga ah.

### Qodobka 4aad
### Faafinta Shaxda "Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka"

Wasaaraddu waa inay ku daabacdaa mareegaha (website) Wasaaradda iyo Furdooyinka"Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka" (marka laga reebo qiimaha lagu asteeyay faqrada (d) ee Qodobka 3-aad).

### Qodobka 5aad
### Waxkabadalka shaxda "Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka"

Wasaaradda Maaliyadu waxa ay wax ka beddeli kartaa Jadwalka wakhti kasta, waana in ay daabacdaa Jadwalka wax laga beddelay si waafaqsan Qodobka 4-aad.

## Qodobka 6aad

## Taariikhda uu dhaqangalayo waxkabadalka jadwalka

Haddii Jadwalka wax laga beddelo, wax ka beddelkaas waxa lagu dabaqi karaa oo keliya badeecadaha la canshuurayo kadib maalinta wax ka beddelku uu dhaqan galo.

# QEYBTA 3AAD

# DABAQIDA "JADWALKA QIIMAHA ALAABTA EE FURDOOYINKA"

## Qodobka 7aad

## Haddii la waayo Caddeynta qiimaha alaabta la soo dhoofiyay

Haddii cadeeyaha badeecada ku guul-darreysto in uu keeno caddayn qoraal ah oo ku saabsan qiimaha alaabta, wakhtiga uu sameynaayo caddeynta badeecada uu soo dhoofiyay, maamulka furdooyinka waxuu ku go``aan qaadanayaa sicirka buuga (Book value) ee ku cad jadwalka, waxa uuna dabaqayaa "Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka".

## Qodobka 8aad

## Alaabta lasoo dhoofiyay hadii aysan laheyn cadeyn ku filan qiimaheeda

Haddii Maamulka Furdooyinka aanu ku qancin ansaxnimada ama nuxurka dukumeenti kasta oo uu soo gudbiyay cadeeyaha badeecada oo ku saleeysan qiimahooda, sidaas awgeedna aan la aqbali karin qiimaha alaabtaas, Maamulka Goobta Furdaddda waa in uu:

(a) Wargaliyaa cadeeyaha badeecada dukumiintigiisa in aan la aqbalin, maadaama uu ka hooseeyo sicirka jadwalka ku cad (Book Value); iyo

(b) In looga baahan yahay cadeeyaha badeecada in uu bixiyo macluumaad dheeraad ah ama dukumeenti si loo caddeeyo qiimaha la sheegay ee alaabta.

(c) Ugu dambeyn waxaa la isticmaalayaa qiimaha buuga (Minimum Book Value) ee ku cad Jadwalka

## Qodobka 9aad

## Wax ka badalka qiimaha alaabta alaabta la soo dhoofiyay marka la soo gudbin waayo warbixin dheeri ah amma caddeyn lagu qanco

1) Hadii –

(a) Madaxa goob Furdo uusan ku qancin macluumaad dheeraad ka ah ama dukumeenti ah oo uu bixiyo cadeeyaha badeecada iyada oo la raacayo ogaysiinta sida waafaqsan Qodobka 8 (b); ama

(b) Cadeeyaha badeecada ku guuldareysto inuu bixiyo macluumaad dheeraad ah amma dukumeenti marka loo baahdo sida waafaqsan Qodobka 8(b),

Maamulka Furdooyinka waxa uu go'aamin karaa qiimaha waajibka ah canshuurta alaabtan, iyada oo la tixgalinayo dhammaan macluumaadka la helay inta lagu jiro baaris kasta oo la sameeyay, muunad kasta ama hubin walba, isaga oo dabaqaya "Jadwalka qiimaha alaabta ee Furdooyinka"

## Qodobka 10aad
## Xuquuqda Racfaan qaadashada

Go'aanka Sarkaalka u idman goob Furdo ee Qodobka 7-aad amma Qodobka 9-aad waa go'aan canshuureed, sida uu qabo qodobka 52-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, waxaana laga qaadan racfaan si waafaqsan Madaxa VII ee sharcigaas.

## Qodobka 11aad
## Dhaqangalka

Xeer-nidaamiyahaani wuxuu dhaqan-galaayaa marka uu saxiixo Wasiirka Wasaarada Maaliyadda laguna soo daabaco Mareegta (Website) Wasaaradda Maaliyadda & midda Furdooyinka Soomaaliyeed.

**Wada Shaqayn Wacan,**

27/02/2022

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE MINISTER
XAFIISKA WASIIRKA
MINISTRY OF FINANCE & TREASURY
WASAARADDA MAALIYADDA & LACAGTA

**Dr. Cilmi Maxamuud Nuur**
**Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**

Ministry of Finance
Corso Somalia Street, Shangaani District Mogadishu, Somalia
P.O. Box 106
Email: minister@mof.gov.so
www.mof.gov.so